



Caruurta 5 jirka ah iyo wixii ka wayn iminka waxay qaadan karaan talaalka COVID-19 iyo talaalka xoojinta.

Caruurta 5 jirka ah iyo wixii ka wayn iminka waxay qaadan karaan taxanaha talaalka kowaad ee COVID-19 iyo talaalka cusub ee (bivalent) ee talaalka xoojinta COVID-19. [Macluumaad dheeraad ah ka akhri talaalka COVID-19 ee caruurta.](#)

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ayaa ku daboolo baaritaanada COVID-19 iyo talaalada hargabka guriga ee loogu talloagalay xubnaha OHP iyo CWM.

- Caruurta iyo dadka waawayn ee OHP waxay qaadan karaan labada talaal isku wakhti, ama booqashooyin kala duwan.
- Xubnaha CWM waa inuu qaataa labada talaal isku booqasho. Talaalka hargabka waxaa kaliya la bixiyaa marka isku booqasho lagu qaato talaalka COVID-19.

Talaalada COVID-19 iyo hargabka waxaa laga heleyaa farmasiga, xafiiska dhakhtarka, xarumaha caafimaadka, iyo isbitaalada.

- Booqo [Vaccines.gov](https://www.vaccines.gov) si aad u hesho talaalka COVID-19.
- Booqo [Flu.Oregon.gov](https://www.flu.oregon.gov) si aad u hesho talaalka hargabka.

[Vaccines.gov](https://www.vaccines.gov) sidoo kale waxaa ku qoran meelaha bixin kara talaalada hargabka iyo COVID-19.

Maamulka Caafimaadka Oregon waxay si wayn ugu dhiiri gelinaysaa qof kasta inuu qaato labada talaal ee COVID-19 iyo hargabka hadii uu awoodo.

- Caruurta 6 sano jirka iyo wixii ka wayn waxay uu qaadankaraa talaalka hargabka. Waalidka iyo koryayaashu waa inay geeyaan caruurta u dhaxeeya 6 bilood iyo 2 sano dhakhtarka ilmaha si loo siiyo talaalka hargabka.
- Dhalinyarta 15 sano jirka ah iyo ka wayn waxay u baahan yihiin ogolaanshaha waalidka si loo talaalo.

Farmasiiyadu waxay iminka siin karaa caruurta talaalka COVID-19 iyo hargabka.

Waalidka iyo koriyayaasha waxay sidoo kale caruurta gayn karaan farmasiga qaata caymiska OHP ama CWM oo waxa uu diyaar u yahay inuu siiyo talaalka caruurta.

- Caruurta 3 jirka iyo wixii ka wayn waxay ka qaadan karaan talaalka hargabka farmasiga.
- Caruurta 5 jirka iyo wixii ka wayn waxay ka qaadan karaan talaalka COVID-19 farmasiga.

Caruurta 5 jirka iyo wixii ka wayn waxay ka qaadan karaan talaalka COVID-19 iyo talaalada hargabka isku mar ama wakhtiyo kala duwan farmasiga.

Sii qorshayso kahor inta aanad caruurta u doonin talaalada COVID-19 iyo hargabka.

Hel bixiye talaalka oo qaata OHP oo diyaar u ah inuu siiyo talaalada hargabka iyo COVID-19 caruurta yaryar.

- Haddii aad qorshaynayso inaad booqato farmasiga, la xidhiidh farmasiga si aad u xaqiijiso inay wada qaateen talaalada, oo ay siin karaan ilmahaaga talaalada, oo ay qaataan OHP.
- Haddii caruurtaadu ay leeyihiin daryeel bixiye kowaad (PCP), waydii PCP-ga ikhtiyaarada talaalada.

Mahaysaa su'aalo OHP ku saabsan?

Haddii aad ubaahantahay caawimaadda inaad hesho bixiye talaalka oo qaata OHP:

- La xiriir CCO. [Si loo helo warbixinta xiriirka CCO iyo illaha riix halkaan.](#)
- Haddii aadan ku jirin CCO, soo wac Xiriirinta Daryeelka OHP ee 800-562-4620. Xubnaha Dhaladka Ameerikaanka iyo Dhaladka Alaaskaan oo sidoo kale ka soo wici karo Xiriiriyaha Daryeelka Qabiilka CareOregon 844-847-9320.

Wax badan ka baro wax ku saabsan caymiska OHP iyo CWM inta lagu jiro COVID-19

- [Wixii macluumaad dheeraad ah oo loogu talagalay Xubnaha CWM.](#)
- Sidoo kale booqo [bogga xubnaha OHP COVID-19.](#)

Haddii aadan laheyn caymiska caafimaadka, codso OHP maanta.

Waad ka codsan kartaa [ONE.Oregon.gov](https://one.oregon.gov).

Ma hubo haddii OHP kuu fiicantahay adiga?

Booqo OregonHealthCare.gov iyo jawaabta su'aalaha baaritaanka. Tan ayaa kugu caawineyso helida barnaamijka sida wanaagsan kuugu shaqeeyo adiga iyo qoyskaaga.

Jaalalka bulshada tababaran oo gobolkoo dhan ah ayaa kugu caawin karo buuxinta codsiga. Waa bilaash. Booqo OregonHealthCare.gov si aad u heshid iskaashatada bulshada ee aagaaga.

OHP.Oregon.gov

Helitaanka dukumintiga: Dadka naafada ah ama shaqsiyaadka ku hadla luuqad aan ahayn Ingiriisi, OHA ayaa bixin karta xogta oo lagu heli karo qaabab kale sida ayadoo turjuman, far waawayn ku qoran, ama farta indhoolka ku qoran. Kala xariir Xarunta Isgaarsiinta COVID-19 ood ka wacayso 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.